

# Dawladda oo fududaynaysa tillaabooyinkii

Tillaabooyinkii heerka qaran ahaa weli waa loo baahan yahay. Waxaana la filayaa in uu dad badan cudurka ku dhici doono toddobaadyada soo socda, laakiin bulshadu intii hore in ka badan ayay fayraska u adkaysan kartaa. Taas awgeed ayaana waxyaalo badan la fududayn karaa.

- Marka hadda tillaabooyinka la fududaynayo waxaa mudnaanta la siinayaa carruurta, dhallinyarada iyo goobaha shaqada. Waxaa la fasaxayaa waxyaalaha ay ka midka yihiin ciyaaraha carruurta iyo dhallinyarada. Waxaan soo-jeedinaynaa in heer cagaaran la geliyo dugsiyada sare iyo waxbarashada dadka waaweyn iyo in heer jaalle ah la geliyo xannaanooyinka carruuraha iyo dugsiyada hoose/dhexe. Degmooyinku iyaga ayaa go'aamin kara heerka tillaabada iyaga oo ku salaynaya xaaladda is-qaadsiinta cudurka. Waxaan isla markaana fududaynaynaa xeerarkii karantiilka oo waxaan degmooyinka ka codsanaynaa in ay mudnaanta siiyaan meelaha uu cudurku sida weyn ugu faafayo, ayuu yiri raysal wasaare Jonas Gahr Støre.

Wax-ka-beddelka dawladdu ku samaysay tillaabooyinka wuxuu ku salaysan yahay talooyinkii Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Si joogto ah ayay dawladdu u qiimaysaa heerka tillaabooyinka, qiimayn cusub ayaana mar kale la samayn doonaa billowga bisha febraayo.

## **Si wanaagsan ayaa loola socdaa xaaladda omikoroonka**

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu wuxuu filayaa in ay mustaqbalka kordhi doonto tirada dadka cudurka qaadaya, laakiin wuxuu Machadku caddeeyay in ay yar tahay halista xanuunka uu fayrasku keeno. Laakiin waxaa dhici karta in dad badan isbataallada la dhigo toddobaadyada soo socda marka ay dad badan cudurka la xanuunsadaan.

– Waxaan hadda galnay weji cusub oo ah cudurkii safmarka ahaa. Waxaan og nahay in uu yar yahay cudurka halista ah ee omikroonku keeno, oo ay hooseyso suurtagalnimada in qofka isbataal la dhigo. Dad ka badan hal milyan oo norwiiji ah ayaa tallaalka qaatay afartii toddobaad ee u danbeeyay, waxaana kordhay helitaanka tijaabada degdegga ah. Tallaalku si wanaagsan ayuu qofka uga difaaca in uu cudurka aad ugu xanuunsado, ayuu yiri raysul wasaaruhu.

## **Caqabadaha waxa la awoodo**

Suurtagal ma aha lamana doonayo in la joojiyo mawjad safmar oo xilliga qaboobaha ah oo omikroon sabab u yahay. In kasta oo aan tirada weli la hubin, haddana dad badan ayaa xanuunsan doona, waxaa kordhi doona kuwa shaqada uga maqnaan doona jirro darteed, adeegyada caafimaadkana culays dheeraad ah ayaa fuuli doona.

Hadda inta xilliga qaboobaha lagu jiro habka wax looga qabanayo safmarka wuxuu noqon doonaa in cudurka la hakiyo – ayada oo ay jiraan tillaabooyinka ugu fudud ee suurtagalka ah. Waa in aan ka hortagnaa in ay dad badan hal mar wada xanuunsadaan, taas oo keenta in uu culays xad-dhaaf ah fuulo adeegyada caafimaadka- iyo daryeelka iyo bulshadaba.

– Sidaas darteed ayay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) u qabaan in tillaabooyinka badankooda la sii wado, laakiin qaar la fududeeyo. Muhiimku waa in wadarta tillaabooyinka ka hortagga cudurku ay naga caawiyaan xakamaynta cudurka, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Wax-ka-beddelaadda hadda la soo rogay waa heer qaran. Degmooyinku weli deegaannadooda way ku soo rogi karaan ama sii wadi karaan tillaabooyin kuwaan ka adag.

## **Maqnaashada jirrada iyo wax-ka-beddelka xeerarka karantiilka**

Wax-ka-beddelaad ayay dawladdu hadda ku samaynaysaa qaar ka mid ah istaraatiijiyaddii Tijaaba-qaadka, Gooni-u-bixidda, Raadraaca Cudurka iyo Karantiilka (TISK). Xeerarkii karantiilka ayaan wax ka beddelaynaa oo hadda karantiilkii waxaa inta badan lagu beddelayaa tijaaba-qaadis.

– Dad badan ayuu cudurku ku dhici doonaa bilaha soo socda, dad badan ayaana jirro shaqada uga maqnaan doona. Dhammaan shirkadaha iyo goobaha shaqadu waa in ay taas u diyaargarobaan. Waa in la qorsheeyaa sidii ay hawluhu caadi ugu socon lahaayeen ayada oo lagu jiro xaalad adag. Wax-ka-beddelaadda ay dawladdu hadda ku samaynayso xeerarka karantiilka ayaa keenaya in ay dad badan si caadi ah u noolaadaan in kasta oo uu cudurku bulshada dhexdeeda ku badan yahay, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelku.

- Eeg war-saxaafadeedka ku saabsan TISK.

## **Shubidda khamriga oo la joojinayo saacadda 23**

Bartammihii bishii diseembar ayay dawladdu waddanka oo dhan joojisay shubidda khamriga kaddib markii ay sidaas ku taliyeen Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Hay'adahaas ayaa hadda qaba in tillaabadaas la fududayn karo.

– Waxaan hadda fasaxaynaa shubidda khamriga, laakiin waxaa la joojinayaa saacadda 23.00. Khamriga waxaa lagu bixinayaa miisaska maaddama taasi yaraynayso socodka martida oo ay gacan ka geysanayso ka hortagga is-qaadsiinta cudurrada, ayay tiri Kjerkol.

- [Eeg war-saxaafadeedka ku saabsan shahaadada koroona.](#)

## **Waa kuwan tillaabooyinka heer qaran**

*Waxay dhaqangelayaan laga billaabo saqda dhexe habeennimada jimcaha 14-ka jannaayo. Wax-ka-beddelaadda ku saabsan xannaanooyinka carruuraha, iskoollada iyo kuwa SFO waxay dhaqangelayaan laga billaabo saqda dhexe habeennimada sabbtida 15-ka jannaayo. Waxaa tillaabooyinka mar kale qiimayn lagu samayn doonaa billowga febraayo.*

## **Talooyinka guud ee ka-hortagga cudurrada**

- Ku dadaal nadaafadda gacmaha iyo midda qufaca
- Qaado tallaalada

- Guriga joog haddii aad xanuunsato
- Tijaabo iska qaad oo covid-19 iska baar haddii aad isku aragto calaamadaha marinnada hawada oo cusub

## **Kala fogaanshaha iyo isu-imaanshaha dadka**

- Waxaa dadka oo dhan lagula talinayaa in 1 mitir laga fogaado dadka kale marka laga reebo dadka guriga la deggan iyo kuwa uu kala dhexeeyo xiriir kale oo dhow
- Soo-jeedinta masaafada 1-ka mitir ma khuseyso carruurta aadda xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada hoose
- Soo-jeedintu ma khusayso dadka waaweyn ee ka shaqeeya adeegyada loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada iyo dadka nugul.
- Qof kastaa ha ka fekero inta qof ee uu guud ahaan u dhawaanayo.
- Waxaa lagu talinayaa in aad yarayso tirada dadka aad u dhawaanayso, laakiin dadka ha iska qoqobin
- Ma wacna in guriga lagu casuumo marti ka badan 10 qof marka laga reebo dadka guriga deggan.
- Carruurta aadda xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada hoose (ee isku kooxda ah) waa laga dhaafay soo-jeedinta xaddidaadda tirada.
- Waxa la soo jeedinayaa in si wacan loo layriyo qolka marka hal qol muddo dheer lala joogo dad aan guriga degganayn ama aan lala lahayn xidhiidh kale oo dhow
- Waxaa la soo jeedinayaa in dadka kale dibedda lagula kulmo marka ay taasi suuragalka tahay
- Waxaa la soo jeedinayaa in aan gacanta la iska salaamin
- Dadka halista ugu jira in ay aad ugu xanuunsadaan haddii uu cudurku ku dhaco iyo dadka waaweyn ee aan tallaalnayn, waa in ay is ilaaliyaan oo ay weliba si gaar ah uga taxaddaraan ama iska daayaan: meelaha ay dadka badani isugu yimaadeen ama meelaha cuntada iyo cabbitaanka lagu bixiyo ee ay caadiyan adag tahay in la kala fogaado – iyo safarrada aan lagama maarmaanka ahayn ee lagu tegayo meelaha cudurku ku badan

yahay. Si kastaba, looma baahna in ay dadkani is qoqobaan. Waa muhiim in qofku dad xiriir la leeyahay.

- Waxaa lagu talinayaa in aan gaadiidka dadweynaha la raacin marka uu ciriiri yahay

## **Af-daboolka**

- Af-daboolku waa waajib marka aan ugu yaraan hal mitir la kala fogaan karin ee la joogo dukaammada, suuqyada waaweyn, goobaha cuntada iyo cabbitaanka, gaadiidka dadweynaha, gudaha goobaha laga raaco gaadiidka dadweynaha iyo taksi. Waajibku wuu khuseeyaa xataa shaqaalaha haddii aan loo dhaxaysiin wax kala xidha.
- Looma baahna in af-dabool la xirto marka la fadhiyo miis goob cunto- iyo cabbitaan.

## **Isboortiga iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada ah ee abaabulan**

- Waxa wacan in firfircoonida wakhtiga firaaqada ah lagu qabto dibedda ilaa intii ay suurtagal tahay.

Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano:

- Firfircoonida dibedda ka dhacda si caadi ah ayaa loo qaban karaa
- Tirada dadka meel gudaha ah wada joogi kara waxaa lagu talinayaa in ay ahaato qiyaastii 20 qof ama in loo wada joogo intii isku fasal/isku koox ah ah
- Firfircoonida gudaha ka dhacda waa la qaban karaa ayada oo la is taabanayo mararka ay lagama maarmaanka tahay

Dadka ka weyn 20 sano:

- Gudaha waxaa lagu talinayaa in la ahaado ugu badnaan 20 qof oo 1 mitir la kala fogaado. Marka sida xoogga ah loo tababaranyo waxaa wanaagsan in 2 mitir la kala fogaado
- Dadka waaweyn si caadi ah ayay u qaban karaan firfircoonida dibedda ka dhacda, ayada oo la is taabanayo mararka ay lagama maarmaanka tahay

- Ciyaaraha heerarka sare waxaa loo qaban karaa si caadi ah ayada oo la raacayo tillaabooyinka ka hortagga cudurrada

## **Xannaanooyinka, iskuullada iyo SFO-yada**

- Hadda laga bilaabo ma jiro xeer-nidaamiye sheegaya in xannaanooyinka carruurta, dugsiyada hoose/dhexe iyo SFO-yada la geliyo heerka tallaabooyinka qaran ah ee huruudda ah.
- Hadda laga bilaabo ma jiro xeer-nidaamiye sheegaya in dugsiyada sare la geliyo heerka tallaabooyinka qaran ah ee casaanka ah.
- Weli waxa shardi ah in hawlaha loo fuliyo qaab aan ka soo horjeedin ka hortagga is-qaadsiinta cudurka
- Waxa si heer qaran ah lagu talinayaa in xannaanooyinka carruurta iyo dugsiyada hoose/dhexe la geliyo heerka huruudda ah marka xaaladda is-qaadsiinta ee deegaanku sidaas tilmaamayso, laakiin degmooyinka ayaa loo baahan yahay in ay qaataan go'aammada ku habboon xaaladda is-qaadsiinta cudurka ee ka jirta deegaanka.
- Waxa si heer qaran ah lagu talinayaa in dugsiyada sare iyo waxbarashada dadka waaweyn la geliyo heerka cagaarka ah, laakiin degmooyinka ayaa loo baahan yahay in ay qaataan go'aammada ku habboon xaaladda is-qaadsiinta cudurka ee ka jirta deegaanka.
- Tijaabo-qaadista joogtada ah ee iskuullada iyo xannaanooyinka waa in loo isticmaalo si ka badan sidii hore marka la joogo meelo heerka is-qaadsiintu aad u sarreeyo.
- Degmooyinka waxa laga codsanayaa inay la socdaan xaaladda faafidda cudurka oo ay isticmaalaan heerarka tallaabooyinka ee ku habboon xaaladda jirta. Xannaanooyinka iyo iskuulladu waa in ay diyaar u ahaadaan in ay si degdeg ah u geli karaan heer tallaabooyin oo ka adag ka ay markaa ku jiraan.

## **Waxbarashada sare**

- Weli waxa shardi ah in hawlaha loo fuliyo qaab aan ka soo horjeedin ka hortagga is-qaadsiinta cudurka

- Jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyada waxa lagu talinayaa inay kordhiyaan cashar-bixinnada ay ardaydu goobta joogayso.
- Waxa shardi ah in lagu dhaqmo talooyinka guud ee ka hortagga is-qaadsiinta cudurka: laydhinta qolka, kala fogaanshaha iyo in guriga la joogo marka la iska dareemo calaamadaha cudurka.
- Haddii la heli karo tijaabooyinka, waxa lagu talinayaa in la diyaariyo sidii ardayda looga qaadi lahaa tijaabooyin joogto ah. Waxa habboon in tijaabooyinka loo qaybiyo ardayda, waxaana wacan in tijaabooyinka si fudud looga heli karo goobta waxbarashada.
- Waxa habboon in ardayda hal qol ku wada qaaddanaysaa cashar-bixin/cashar ka shaqayn/siminaar aanay ka badanin 30 qof oo 1 mitir kala fogaanaya. Waa la iska dhaafi karaa shardiga kala fogaanshaha marka aan laga maarmi karin si loo fuliyo cashar-bixinta.
- Cashar-bixinnada lagu qabanayo hoolasha waaweyn waxa khuseeya xadidnaanta tirada dadka ee loogu talagalay qabanqaabooyinka guud ee dadku haystaan goobo la fadhiisto oo joogto ah loona tilmaamay, iyo shuruudaha ah in hawlaha loo fuliyo qaab aan ka soo horjeedin ka hortagga is-qaadsiinta cudurka.

## **Shaqooyinka**

- Waajib ku saabsan in ay shaqabixiyayaashu shaqaalaha u fududeeyaan in ay guriga ku shaqeeyaan haddii ay taasi suurtagal tahay oo aanay wax u dhimayn adeegyada muhiimka iyo lagama maarmaan u ah hawlaha goobta shaqada, tusaale ahaan marka la daryelayo carruur ama dadka nugul.
- In guriga lagu shaqeeyo iyo af-daboolku ma khuseeyaan adeegyada ay caqabad ku noqonayaan in shaqaaluhu gutaan hawlhooda lagama maarmaanka ah ee sharcigu ku waajibiyay, marka ay u shaqaynayaan dadka nugul iyo carruurta iyo dhallinyarada
- Soo-jeedinta masaafada 1-ka mitir

- Soo-jeedin ku saabsan in la xidho af-dabool haddii aan la kala fogaan karin, marka aan la isticmaalin waxyaallo dadka kala qaybinaya sida gidaarrada qoqobida ama wax la mid ah.
- Waajibka isticmaalka af-daboolka ayaa lagu soo rogayaa qaybo ka mid ah goobaha shaqada ee lagu qaabilo dadweynaha. Eeg meelaha hoose ee looga hadlayo "Af-daboolka".
- Waxa la soo jeedinnayaa in si wacan loo layriyo qolka marka hal qol muddo dheer lala joogo dad aan guriga degganayn ama aan lala lahayn xidhiidh kale oo dhow.

## **Qabanqaabooyinka iyo isu-imaanshooyinka**

- Waxa jira shuruudo ku saabsan ka hortagga is-qaadsiinta, kala fogaanshaha iyo af-daboolka.
- Yaree isu-imaanshooyinka iyo qabanqaabooyinka aad ka qaybgalayso
- Qabanqaabooyinka/isu-imaanshooyinka gaarka ah ee lagu qabto goob dadweyne, goob la kiraystay/ammaanaystay:  
Gudaha: Ugu badnaan 30 qof, kulannada tacsida ah ugu badnaan 50 qof.  
Dibedda: Ugu badnaan 50 qof.  
Isticmaalka af-daboolku waa ku waajib dadweynaha gudaha jooga.
- Qabanqaabooyinka guud ee gudaha ah:  
Marka aan dadku haysanin boosas joogto ah oo loo tilmaamay: Ugu badnaan 30 qof.  
Marka uu dadku haysto boosas joogto ah oo loo tilmaamay: Ugu badnaan 200 qof.  
Isticmaalka af-daboolku waa ku waajib dadweynaha qabanqaabada jooga.
- Ma lagu talinayo in dib loo dhigo ama la baajiyo qabanqaabooyinka gudaha ah ee la xidhiidha firfircoonida wakhtiga firaaqada ah ee abaabulan ee isu keenaya carruur iyo dhalinyaro ka yar 20 sano oo ka kala yimi deegaanno kala duwan.
- Ciyaaraha Isboortiga ah ee koox-koox loo ciyaaro waxa lagu talinayaa in la ciyaaro keliya ciyaaro gooni-gooni ah, oo aan la ciyaarin ciyaaro ka mid ah horyaal, isreeb-reeb ama wax la mid. Ciyaaraha isboortiga ee qof-qof loo



ciyaaro waxa lagu talinayaa in xilliga tartannada la koobo tirada dadka hal mar wada tartamaya.

- Ciyaartoyda iyo soo bandhigeyaasha iyo shaqaalaha kalkaaliyeyaasha ah ee qabanqaabooyinka dhaqanka iyo isboortiga ee ah kuwo guud oo gudaha lagu qabanayo ee ay markaana carruur iyo dhallinyaro 20 sano ka yar samaynayaan firfircoonida, ma lagu darayo tirada guud ee dadka joogi kara qabanqaabada.
- Shardiiga kala fogaanshaha waxa laga dhaafayaa soo bandhigeyaasha iyo ciyaartoyda qabanqaabooyinka dhaqanka iyo ciyaaraha isboortiga ah.
- Qabanqaabooyinka dibedda ka dhacaya ee la xidhiidha dhaqanka, isboortiga iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada ah ee loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano, waxa la qaban karaa iyada oo aan wax xadidnaan ah lagu samaynin tirada ka-qaybgalayaasha islamarkaana waxa joogi kara dad waaweyn oo tiradoodu tahay inta aan laga maari karin. Haddii ay joogaan in ka badan 100 qof, ma la diyaarin karo meelo dadweynuhu joogo ama meelo gudaha ah oo dadku isticmaalo, suuli mooyaane.

## **Gaadiidka dadweynaha**

- Waxa lagu talinayaa in la iska dhaafo raacista gaadiidka dadweynaha marka uu cidhiidhi yahay.
- Waxa shardi ah in af-dabool la isticmaalo haddii aan la kala fogaan karin 1 mitir.
- Marka la raacayo tagsi wa waajib in rakaabka iyo darawalkuba isticmaalaan af-dabool.

## **Goobaha cuntada iyo cabbitaanka**

- Goobaha khamriga iibin karaa waa inay shubista khamriga joojiyaan saacadda 23.00, isla markaana waa in qofku saacadda 23.00 joojiyo inuu khamri ku cabo goobta khamriga bixisay.
- Khamriga waa in loo geeyo macmiisha oo miis fadhida.

- Goobta cuntada iyo cabbitaanku waa in ay ilaaliso in qof kasta ugu yaraan 1 mitir ka fogaado dadka kale ee aan guriga la degganayn ama aan xidhiidh kale oo dhow ka dhaxaynin.
- Waxa shardi ah in af-dabool la isticmaalo haddii aan la kala fogaan karin 1 mitir, laakiin ma loo baahna marka la fadhiyo miiska.
- Waa waajib in la diiwaangeliyo martida oggolaata.

## **Karantiilka iyo tijaabo-qaadista**

- Dadka u dhawaaday qof cudurka laga helay ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qofkaas cudurka laga helay, waa inay galaan karantiil 10 maalin ah laga bilaabo markii ugu dambaysay ee ay u dhawaadeen qofka.
- Dadkaasi waa inay sida ugu dhakhsaha badan iska qaadaan tijaabada qofku iskii iska qaado, tijaabada degdegga ah oo shaqaale caafimaad qaadayo ama tijaabo PCR ah. Haddii cudurka laga waayo tijaabo noocyadaas ah oo la qaaday ugu horreyn markii ay 7 maalin ka soo wareegtay markii qofka loo dhawaaday, waa laga bixi karaa karantiilka.
- Waajibka karantiilku ma khuseeyo dadka uu covid-19 ku dhacay xilli ka mid ah 3-dii bilood ee u dambeeyay.
- Waajibka karantiilku ma khuseeyo dadka irbad tallaal oo xoojin ah qaatay ugu yaraan hal toddobaad ka hor xilligii ay u dhawaadeen qofka cudurka laga helay, ee islamarkaana maalin kasta iska qaadaya tijaabada qofku iskii iska qaado, tijaabada degdegga ah oo shaqaale caafimaad ka qaaday, ama tijaabada PCR oo maalin dhaaf ah oo uu wadayo muddo 7 maalin ah laga bilaabo xilligii uu u dhawadaay qof cudurka laga helay.
- Waxa kale oo jira dad gaar ah oo laga dhaafay, sida shaqaalaha aan laga maarmi karin ee ka shaqeeya goobaha aad ugu muhiim ah bulshada.

Karantiilku waajib kuma aha dadka kale ee u dhawaaday qof cudurka laga helay, laakiin waxa lagula talinayaa inay tijaabo iska qaadaan 3 maalmo kadib markii ay qofka u dhawaadeen, ka dibna tijaabo cusub 2 maalin ka dib (maalinta 5-aad). Si gaar ah ula soco in calaamadaha cudurku kugu

yimaadaan 10-ka maalin ee u horreeya. Haddii aad calaamadaha iska dareentid: Guriga joog oo tijaabo iska qaad.

Eeg warbixin gaar ah oo ku saabsan TISK.

## U shaqaynta hab waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta

- In loo shaqeeyo hab waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka waxa macnaheedu yahay in ay shardi tahay in la ilaaliyo in qof kasta ugu yaraan 1 mitir ka fogaan karo dadka kale ee aan guriga la degganayn ama aan xidhiidh kale oo dhow ka dhaxaynin, iyo in goobtu diyaariso nidaamyo loogu talagalay in lagu ilaaliyo fayodhowrka, nadaafadda goobta iyo layrinta
- Waajib ku saabsan in hawlaha xannaanooyinka carruurta, iskuullada iyo goobaha kale ee tababbarrada iyo waxbarashada loo qabto hab waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka.
- Goobaha dalxiiska madaddaalada, lekeland, hoolasha ciyaaraha iyo meelaha la midka ha waa la xirayaa.
- Goobaha jimicsiga, hoolasha dabaasha, badeland, goobaha isbaaga, dabaasha hoteellada, hoolasha bowlinga iyo meelaha la mid ah waxa loo oggol yahay inay ugu badnaan 20 qof ka qaybgalaan jimicsi kooxeed oo gudaha ka dhacaya.
- Goobahan/meheradahan ayaa laga rabaa in ay hawlahooda u gutaan si waafaqsan ka hortagga is-qaadsiinta cudurka si ay u sii furnaan karaan: Maktabadaha, hoolasha bowlinga, matxafyada, hoolasha biingada, hoolasha dabaasha, badeland, goobaha isbaaga, dabaasha hoteellada , goobaha jimicsiga, suuqyada waaweyn, dukaammada, bandhigyada badeecooyinka, suuqyada aan rasmi ahayn iyo waxyaalaha la midka ah.
- Maktabadaha, matxafyada, dukaammada iyo suuqyada waaweyn mooyaane, waa in goobuhu diiwaangeliyaan macluumaadka meelaha lagala xidhiidhi karo dadka soo booqday ee oggol.
- Waxa wacan in hageyaashii u gaarka ahaa noocayada meheradaha dib loogu soo rogo meelaha ay ka mid yihiin xarumaha jimicsiga iyo hoolasha

dabaasha. Taas oo ka dhigan in la adkaynayo shuruudihii ka hor-tagga cudurrada

## **Soo gelidda – imaanshaha Norway**

- Dhammaan dadka socdaalka ahi waa inay caadi ahaan is diiwaangeliyaan ka hor intaanay iman Norway.
- Dhammaan dadka socdaalka ahi waa inay caadi ahaan tijaabo iska qaadaan markay soo gelayaan Norway.
- Qofka socdaalka ah ee aan keeni karin shahaado koroona oo la xaqiijin karo oo caddaynaysa in uu si buuxda u tallaalan yahay ama in covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, waa inuu caadi ahaan tijaabo iska qaado ka hor intaanu bilaabin safarka uu Norway ku imanayo.

Dadka socdaalka ah ee ka imanaya waddan uu karantiilku waajib ku noqonayo qofkii ka yimaada ee islamarkaana aan keeni karin shahaado koroona oo la xaqiijin karo oo caddaynaysa in uu si buuxda u tallaalan yahay ama in covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, wa inuu caadi ahaan galo karantiilka soo gelidda waddanka.

[Faahfaahin ku saabsan xeerarka soo gelidda waddanka ka akhriso helsenorge.no](https://www.helsenorge.no)

Is dhinac dhig tallaabooyinkii la soo rogay 9-kii Desember, 16-kii Desember iyo badhtamihii Janaayo (pdf) – *wuxu imanaya wakhti dhow*